

# Ogeysiinta Shaqaalaha: Helitaanka Magdhawga Shaqo La'aanta

Shaqaalaha xaruntan ku jira waxay hoos yimaadaan sharciga Caawimaadda Dib-ushaqaalaysiinta (RA) ee South Dakota. Faa'iidooyinka ayaa heli kara shaqaalaha noqday shaqo la'aan ama saacadaha shaqada laga dhigay wax ka yar wakhtiga buuxa, haddii ay yihiin:

- Awood u leh inuu shaqeeyo,
- Loo heli karo shaqo waqtii-buuxa ah, iyo
- Buuxi shuruudaha u-qalmitaanka qaarkood.

*Shaqaalaha si iskood ah shaqada uga tago sabab la'aan, laga saaro ama looga joojiyo anshax-xumo, ama diida inuu aqbalo shaqada ku habboon waxaa laga yaabaa in loo diido dheefaha.*

Waxaad xereyn kartaa sheegashada RA toddobaadka ugu horreeya shaqada dhammaato ama saacadaha la dhimay.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan heerka sheegashadaada RA, waxaad ka wici kartaa Xarunta Adeegga Macmiilka 605.626.2452, iimayl u dir [DLRRAClaims@state.sd.us](mailto:DLRRAClaims@state.sd.us), ama gal akoonkaaga.

FADLAN KU DHEJI OGAYSIISKAN MEEL MUUQATA.  
*(PLEASE POST THIS NOTICE IN A VISIBLE PLACE.)*

Si aad u xareyso sheegasho si onlayn ah, booqo [sd.gov/rabenefits](https://sd.gov/rabenefits) 24 saac maalintii, todobada maalmood ee todobaadka.

Si aad telefoon ugu xarayso sheegasho, wac Xarunta Wicista sheegashada 605.626.3179, Isniin ilaa Jimce, 8 subaxnimo ilaa 4:20 galabnimo. (Waqtiga Dhexe). Codsadayaasha hadalka ama maqalka naafada ah waxay wici karaan 711 ama 800.877.1113.

Waxaad u baahan doontaa inaad bixiso macluumaadka soo socda DLR si aad usameyso sheegashadaada:

- Magac buuxa oo sharci ah
- Lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga
- Lambarka shatiga darawalnimada ama lambarka aqoonsiga Gobolka
- Taariikhda shaqada ee 18 bilood ee la soo dhaafay
- Ogolaanshaha shaqada (haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah ama degane)



SOUTH DAKOTA  
DEPT. OF **LABOR**  
& **REGULATION**

Reemployment Assistance Division  
420 S Roosevelt St | PO Box 4730  
Aberdeen, SD 57402-4730